



UK Health  
Security  
Agency

**NHS**

**Naftaada ka ilaali**

# **cudurada qoorgooyaha iyo sumowga dhiigga**

**adigoo isticmaalaya tallaalka MenACWY**



**i**mmunisation  
the safest way to protect your health

# Cudurka Qoorgooyaha

**Cudurka ‘meningococcal’ qoorgooyaha waa cudur naadir ah laakiin aad ayuu u daran yahay wuxuuna u baahan yahay daaweyn isbitaal oo degdeg ah. Cudurka wuxuu dadka u horseedi karaa naafanimo nolosha wax ka bedeli karta sida in xubin laga gooyo jirka, maqal la'aanta, dhaawaca maskaxda iyo nabaro. Waxaa sababa bakteeriyada ‘meningococcal’ oo u kala qaybsan dhowr kooxood. Kuwa ugu caansan waa A, B, C, W iyo Y. Dhallaanka, carruurta yaryar, kurayda iyo da'yarta ayaa ugu jira khatarta ugu badan ee cudurka qooryaha.**

Bakteeriyada ‘Meningococcal’ waxay sababi kartaa cudurka qoorgooyaha (caabuuq/ barar ku dhaca dahaarka maskaxda) iyo sumowga dhiigga (marka bakteeriyadu gasho dhiigga si ay u keento sumowga dhiigga). Labada cudurba aad bay halis u yihiin waxayna sababi karaan dhimasho, gaar ahaan haddaan wakhti hore la ogaan.

Cudurada qoorgooyaha iyo sumowga dhiigga labaduba waxay kicin karaan ‘sepsis’. Sepsis waa jawaab-celin jireed oo xad dhaaf ah oo nolashada khatar gelisa oo ka dhan ah caabuuq kasta oo waxay u horseedi kartaa dhaawaca xubnaha iyo dhimasho.

## Maxaan ugu baahanahay inaan qaato tallaalka?

---

Da'yarta qaangaarka ah iyo kuwa da'da yar waxay halis sareysa ugu jiraan inay qaadaan cudurka qoorgooyaha, sidaas darteed waxaad u baahan tahay inaad hadda qaadata tallaalka si aad naftaada u ilaalisoo. Kani waa tallaalka badbaado iyo waxtar leh kaas oo qayb ka ah barnaamijka tallaalkada joogtada ah ee dhalinyarada ilaa 2015. Wuxuu sidoo kale yaraynayaa khatarta ah in dadka kale ee kugu xeeran ay qaadaan cudurka. Waxaa laga yaabaa in aad qaadatay tallaalka MenC markaad ahayd ilmo yar ama socod barad laakiin taasi kama ilaalin doonto kooxaha kale ee cudurka qoorgooyaha.

Tallaalka MenACWY wuxuu kordhin doonaa difaacaaga ka dhanka ah MenC wuxuuna kaa caawin doonaa inuu kaa difaaco seddexda kooxood ee kale (A, W iyo Y). Tallaalkani kaama ilaalin doono dhammaan noocyada cudurka qoorgooyaha, sida MenB, sidaas darteed weli waa muhiim inaad ka digtoonaato calaamadaha iyo astaamaha.

## Qasab miyaa inaan qaato tallaalka MenACWY?

---

Maya, laakiin sida ugu fiican ee aad uga ilaalin karto naftaada waa adiga oo qaata tallaalka MenACWY. Adiga, ama waalidkaaga/masuulkaaga, waa inaad oggolaansho ka bixisaan qaadashada tallaalka. Caadi ahaan waxaa tallaalka lagugu siin doonaa dugsiga marka la gaaro sannadka 9-aad marka aad jirsado 13-14 sano. Ha ka walwalin haddii aad seegtay qaadashada tallaalka, waxaad xaq u leedahay inaad tallaalka MenACWY ee lacag la'aanta ah ka hesho kalkaalisada dugsiga ama kooxda tallaalka dugsiga haddii aad weli ku jirto dugsiga ama waxaad ka heli kartaa xarunta GP-gaaga, illaa laga gaarayo dhalshadaada 25aad. Waxaa jira 3 tallaalka oo MenACWY ah, waxaa loo yaqaan MenQuadfi, Nimenrix iyo MenVeo, waxaad halkan ka akhrisan kartaa warqadaha Macluumaadka Bukaanka:

MenQuadfi: [www.medicines.org.uk/emc/product/12818/pil](http://www.medicines.org.uk/emc/product/12818/pil)

Nimenrix: [www.medicines.org.uk/emc/product/4118/pil](http://www.medicines.org.uk/emc/product/4118/pil)

MenVeo: [www.medicines.org.uk/emc/product/2939/pil](http://www.medicines.org.uk/emc/product/2939/pil)

## Tallaalka xanuun ma leeyahay?

Qofna ma jecla duritaanka, laakiin aad ayuu u degdeg badan yahay. Irbadaha la isticmaalo waa kuwa yaryar, waxaadna dareemi doontaa oo keliya muditaanka yar. Haddii aad xoogaa ka cabsanayso in lagu duro, u sheeg kalkaalisada ama dhakhtarka kahor inta aan lagu durin.

## Calaamadaha iyo Astaamaha

**Marka hore cudurka qoorgooyaha wuxuu la mid noqon karaa sidii jiro ifilo ah oo xun. Laakin qof kasta oo uu cudurka saameeyo badiyaa si xun ayuu u bukaan doonaa saacado gudahood. Daawaynta wakhti hore ah ayaa waxay badbaadin kartaa noloshaada sidaas darteed waxaa wanaagsan**

Madax xanuun aad u daran .....

Qoor adag .....

Heerkul sareeya .....

Suuxdin/qallal .....

Lulmo ama inay adagtahay in  
hurdada laga soo kaco .....

Jahawareer iyo/ama xanaaq .....

Gacmaha iyo cagaha oo qabow ah .....

**Ka digtoonow  
iyo astaamaha**

Hal ama in ka badan oo astaamahan ah ayaa laga yaabaa inay soo baxaan waxayna u soo bixi karaan siday u kala horreeyaan waxaana laga yaabaa inay isku dhafmaan astaamaha labada cudur. Waa muhiim inaad raadsato talo caafimaad oo hore haddii adiga ama saaxiibkaa aad leedihiin astaamaha walaaca leh ama ay xaalada si degdeg ah uga sii darayso.

**inaad ka warqabto qaar ka mid ah calaamadaha iyo astaamaha waaweyn.**

**Waa muhiim in la ogaado calaamadaha iyo astaamaha cudurada qoorgooyaha iyo sumowga dhiigga xataa haddii lagu tallaalo maadaama ay jiraan sababo kale oo badan oo sabab xaaladahan.**



Dhibsashada iftiinka aadka u ifaya

Neefsasho degdeg ah

matag/shuban

**calaamadahan  
an caanka ah**

Calool xanuun

Maqaar midab cirro ah leh

Finan/nabarro\*

Kala-goosyada ama  
murqaha oo xanuuna

Sharaxaad buuxda oo ku saabsan calaamadaha iyo astaamaha cudurada qoorgooyaha iyo sumowga dhiigga oo ay ku jiraan sawirro iyo fiidiyowyo ayaa laga heli karaa [www.meningitis.org](http://www.meningitis.org) iyo [www.meningitisnow.org](http://www.meningitisnow.org)

\*eeg qaybta 'Sameey tijaabada galaaska' ee bogga kale ku qoran

## Sameey tijaabada muraayadda/galaaska

Qofka qaba sumowga dhiigga waxaa laga yaabaa inuu yeesho dhowr dhibcood ama finan ah oo leh qandho. Goor dambe finanku waxa ay isu rogayaan burooyin guduudan oo aan ku baaba'ayn cadaadis. Waxaad samayn kartaa tijaabo adiga oo finka ku cadaadinaya dhinaca muraayadda/galaaska. Haddii aad leedahay qandho iyo finan, oo finankana aanu ku baabi'in cadaadis, raadso gargaar caafimaad isla markiiba adigoo wacaya 999 ama raadsanaya qof ku geynaya qaybta gargaarka degdegga ah ee isbitaalka kuugu dhow. Waligaa ha sugin inay kaa soo baxaan finan. Waxay noqon kartaa astaan soo daahday ama waxaa laga yaabaa inaysanba soo bixin. Haddii qof buko oo uu ka sii darayo isla markiiba gargaar caafimaad u raadi.

Maqaarka madow, ka eeg gudaha daboolka indhaha ama saqafka afka halkaasoo dhibcuhu ay aad uga muuqan karaan



## Ma jiraan waxyeelooyin gaar ah?

---

Waa wax caadi ah in xoogaa barar ah, guduudasho ama jilicsanaan ah lagu arko goobta tallaalka lagu durey. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in aad la kulanto madax-xanuun ama aad dareento guud ahaan waxoogaa caafimaad darro ah laakiin astaamahani waa inay baaba'aan hal ama laba maalmood kadib. Haddii aad ka welwelsan tahay wax astaamo ah ka raadso talo caafimaad NHS111 ama rugta GP-gaaga sida caadiga ah.





Haddii aad la kulanto wax waxyeellooyin gaar ah oo looga shakisan yahay tallaalka, waxaad uga warbixin kartaa websaydka Yellow Card, adigoo wacaya 0800 731 6789 (9am ilaa 5pm, Isniinta ilaa Jimcaha) ama adigoo soo dejiisanaya ablikeeshinka Yellow Card.

---

**Cudurka qoorgooyaha, hay'adaha samafalka ee soo socdaa waxay ka bixiyaan macluumaad, talo iyo taageero:**

**Meningitis Research Foundation,** khadka caawinta ee lacag la'aanta ah  
080 8800 3344 – Isniinta ilaa Jimcaha, 9am ilaa 5pm

**Meningitis Now,** khadka caawinta ee lacag la'aanta ah 0808 80 10 388 - Isniinta ilaa Khamiista  
9am ilaa 4pm iyo maalmaha Jimcaha ah 9am ilaa 1pm

---

Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama aad rabto macluumaad dheeraad ah, la hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada dugsiga ama kalkaalisada caafimaadka ee rugta caafimaadka ee dhakhtarkaaga.

Warqadan waxaa soo saartay Hay'adda Ammaanka Caafimaadka UK

© Crown copyright 2024

1P 100K AUG 2023 (APS). Product code: YPMACWY1SO Somali.

UK Health Security Agency gateway number: 2024071.

Warqadda waxaa laga dalban karaa ama laga soo dejiisan karaa:

**[www.healthpublications.gov.uk](https://www.healthpublications.gov.uk)**, adigoo wacaya: 0300 123 1002

(khadadka taleefanka waxay furan yihiin 8am ilaa 6pm Isniinta ilaa

Jimcaha). Nuqullada warqadda ah ee buug-yaraha ee ku qoran luuqadda

Ingiriisiga ayaa la dalban karaa.